

Waxa uu Ka Kooban yahay

Qebta Guryaha Kirada Dadweynaha-----4

- Waa maxay qebta kirada guryaha dadweynahu-----4
- Waa maxay sababta aad u kereysanee guryaha
- Dadweyna-----4

Qebta 1aad: Sida guryaha lagu helo-----5

- 1. Guryo nuucee ah ayaan raadiyaa-----5
- 2. Xageen ka raadiyaa Guryaha-----5
- 3. Sideen go'aan uga garaa in gurigu ugu haboon yahay iyo inkale-----6
- 4. Maxaan sameeyaa ka dib markii aan doorto guri-----10

Qeybta 2aad: marka ugu horeysa waxa waxa la sameeyo markii aad ku guurtid guri cusub-----11

- 1. Heshiiska kireystaha iyo dabaajiga-----11
- 2. Kirada, manfaca guryahay iyo canshuurta-----12
- 3. Sheegida guriga cusub-----13
- 4. Alaabta Guriga-----14

Tijaabada ah-----26

- 5. Qashinka-----14
- Alaabta guriga taal-----27
- Digniinta-----28

Qeybta 3aad: inta aad guriga degan tahay-----17

Tilmaamaha Macluumaadka muhiimka ah-----32

- 1. bixinta kirada iyo biilasha-----17
- 2. ka dhigada guriga kuleyl-----17

Guryaha iyo caafimaadka-38

- 4. Awooda wax'qabadka--20
- 5. Badbaadada Gaaska----20

- 6. Derisnimada iyo Deriswanaaga -----20
- 7. Masuuliyadaada-----21
- 8. Masuuliyada qofka guriga iskleh ama ka masuulka ah -----21

- 9. Xiriirka idinka dhexeeya adiga iyo qofka guriga iskaleh----22

Qeybta 4aad: Markii aad guri ka guureysid----23

- 1. ogeysiis-bixinta-----23
- 2. Aqrinta miterka-----23
- 3. Heshiisyada kale-----23

- 4. Bedelida ciwaanka----24
- 5. Soo celinta dabaajiga---24

- 6. Mudada ogeysiiska-----25
- 7. Kirada iyo Biilasha-----25

Qeybta 5aad: waraaqaha

- Heshiiska mudada'leh-----26

Tilmaamaha Macluumaadka

Liiska Kireystaha Abniga

Hordhac: Ku soo dhowaada Laanta Kireynta Guryaha Shaqsiyaadka

Waa maxay laanta kireynta guryaha shaqsiyaadku?

Areyga 'kireynta guryaha shaqsiyaadka' waa guryaha shirkadaha ama shaqsiyaadku leeyahiin kuwaas oo laga kireeyo qoysaska ama shaqsiyaadka keli keli ah.

Kireysashada guryahaanu waa ka duwan yahiin markii aad degen tahay guri aad adigu leedahay, Councilku leeyahay ama ey leeyahiin shirkada la yiraahdo housing associations.

Waa maxay sababta loo kereysto guryaha shaqsiyaadka ama shirkadahu leeyahiin?

Waxaa jira sababo badan oo aad ku dooran kartid in aad kireysatid guryaha shaqsiyaadka.

Qaar ka mida sababaha ugu waaweynu waa kuwan hoos ku qoran:

Kala doorasho: waxaa aad guryo kala duwan ka heli kartaa meela kala duwan, guryahanu waa sii badanayaan markasta taas oo macnaheedu yahay in guri laga heli kara meelo badan oo kala duwan.

Kirada: kireysashada guryaha noocan ahu waa ka jaban yahiin markii la barbardhigo in aad guri gadatid.

Guurirda: si sahlan ayaad ugu guuri kartaa, una soo degi kartaa haddii aad kireysatid guryaha nuucaan ah

Guryo-La'aanta jirta: guryaha ey leeyahiin consulka iyo housing associationku aad ayey u yar'yahiin. Haddii aad heshana waxaa laga yaabaa in eysan noqon kuwa kagu haboon ama aad ka weydo xaafadii aad dooneysay in aad degto.

Qeybta 1: Sida lagu helo guryaha

1. Guryo noocee ah ayaan raadsadaa?

Marka ugu horeysa waxa aad u baahan tahay in aad ogaatid nooca guriga aad dooneysid iyo meesha aad ka dooneysid.

Ka feker nooca gurigu (ma waxuu ku yaalaa- hoos, kor), xaafada uu Bristol ugu yaalo iyo kirada aad bixin kartid inta ey la egtahay.

Haddii aad qorsheyneysid in dowladau kirada kaa bixiso, ogow inta ey dowladu kuu ogoshahay in ey kaa bixiso. Haddii aad guriga kireystay kadib 7^{da} Abril 2008, waxaa manaafacaadka loo xisaabiyaa nidaqam cusub oo la yiraahdo Gunada manaafacaadka Deegaanka Guryaha (Local Housing Allowance) kaaas oo lagu qiimeeyo inta qol ee aad u baahan tahay, dhaqliga ku soo gala iyo haddii ey jirto hanti meel kuu yaal.

Sharuucda la xiriirta Manaafacaadka Guryaha waa mid aad u adag sidaas darteed waxaa wanaagsan in in aad la xiriirtid Laanta Manaafacaadka Guryaha inta aadan go'aansan in aad guurto.

Waxaa kale oo wanaagsan in aad ka fekertid waqtiga lagaaga baahan yahay in aad guriga ka guurtid iyo inta ey kagu qaadan karto in aad guriga ka guurtid, waxa kale oo wanaagsan in aad xaafado badan guriga ka raadisid si ey u badato fursada aad ku heli kartid.

2. Xageen ka raadiyaa guryaha

Wargeysyada deeganka: waregey'syada la kala yiraahdo Bristol Evening Post, Trade it and Western Daily Press ayaa si joogta ah u xayeysiya guryaha kirada ah.

Borarka: Borarka iyo dariishadaha ku yaal dukanada ayaa lagu dhejiyaa iidhehda guryaha kirada ah.

Wakiilada Guryaha kireeya: Wakiiladu waxaa ey guryaha u maamulaan shaqsiyaadka guryaha iska leh. Wakiiladu lacag kaguma dalaci karaan marka ey guri ku tusaayaan. Haddii aad guri ka kireysatid wakiilada, waxa ey inta badan kaa qaadi doonaan lacag ujro ah taas oo u dhiganta hal dhig markii guriga kiradiisa loo qeybiyo sedex qeyb oo lagu daray canshuur. Inta badan lacagtaanu ma'aha mid kuu sooo noqon doonta. Waxaa kale oo ey hor-maris u qaataan lacag dabaaji ah iyo kiro u dhiganta laba bilood. Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council) kagumala talin karaan in aad guri ka kireysatdi qaar ka mida wakiilad, hase ahaatee qaar ka mida waakiilada waxaa si samafal ah u maamula ururo xirfadleh oo ku dhaqma xeerar, ayagaana kuu sheegi kara liiska xubnahooda. Sedexda urur ee ugu

waaweyn Bristol waa: The Association of Residential Estate Agents, National Association of Estate Agents and Bristol Association of letting and management.

Boga Combuutarka: Waxaa jira bogag badan oo xayeysiya guryaha kirada ah. Haddii aad dooneysid in aad guryo fiirisid gal boga www.accessible-property.co.uk (fadlan ogow waxa bogaan maamula shaqsiyaad qaas ah, Councilkuna kama masuul aha wixii macluumaad ah ee lagu qoro bogaas).

Waxa aad internet bilaash ah ka heli kartaa maktabada (library) ku taala xaafada kuugu dhow.

Haddii aad arday tahay: waxaa aad macluumaadka ka heli kartaa boga jaamacada iyo ururada, waxaa kale oo aad macluumaadka ka heli kartaa bandhig'yada jaamacada.

3. Sideen ku go'aan karaa in gurigu yahay mid igu haboon.

a. Kirada

Tan ugu horeysa ee aad u baahan in aad ogaatid, waa ma bixin kartaa kirada iyo biilasha guriga. Haddii aad dooneysid in aad qaadatid manaafacaadka guryaha, marka hore hubi kirada ey kuu ogol'yahiin. Kirada guryaha qaarkood waa ka hooseyaan inta ey dowladu kuu ogoshahay. Haddii guriga aad degan yahay kiradiisu ka hooseyso inta dowladu kuu ogoshahay, waxa aad lacagta kirada ka dheeraadka ah ka qaadan kartaa ilaa £15.00 todobaadkii, mana aha mid saameyn doonta manfacyada kale, gaar'ahaan manfaca hawl-gabka. Haddii aad tahay qof keligiis ah oo da'diisu ka yar tahay 25, kirada aad bixisid iyo lacagta dowladu kiro ahaan kuu siiso, waa in ey isla'ek'kaadaan.

Dabaajiga, ujrada iyo kirada hor-mariska ah

Dadka guriga iska leh, intooda badan waxa ey qaadaan lacag dabaaji (kaas oo inta badan u dhigma hal bil kiradeed) iyo hal bil oo hormaris ah. Sidaas darteed waa in aad ka fekertid in aad awoodid lacagtaas iyo inkale. Waxaa kale oo aad u baahan tahay in aad ogaatid, lacagta kirada ee dowlada waxaa la bixiyaa markii bisha la dhaafo laba usbuuc sidaas darteed lacagta dowlada uma isticmaali kartid in aad isaga bixisid lacagta hor mariska ah ee lagaa doonaayo.

Waxaa kale oo laga yaabaa in lagu weydiiyo qof damaanad kaa noqda oo kirada bixiya haddii aad adigu bixin weyso.

Qofka damaanada kaa ah ayaa sharci ahaan u qoolan kirada haddii aad adigu bixin weyso. Waxa qofka guriga iska-lahu uu maxkamad saari karaa qofka damaanada kaa ah haddii kireystaha iyo qofka damiinka ahu ey kirada bixin waayaan sidaas darteed waa in qofka damiinka ahu, waxa uu u baahan yahay in uu aqriyo sharciyada ku qoran waraaqda heshiiska, saxiixo, ogaadana in waraaqda uu saxiixaayo ey tahay mid sharci ah oo maxkamad lagu geyn karo. Haddii aadan heli karin damiin, waa in aad heshiis la gashaa qofka guriga iskaleh adigoo raadinaaya si kale oo aad damiin u siin kartid qofka guriga iskaleh sida in aad keentid damiin ka socda shaqo iyo ayadoo weliba la baaro taariikhdaadii hore ee deyn qaadashada.

b. Booqashada guryaha iyo la kulanka dadka guryaha iska-leh ama wakiilada

Tan ugu horeysa ee aad sameysaa waa in ey noqotaa la kulanka qofka guriga iskaleh ama wakiilka.

Qasab kaguma aha in aad kireystid guriga aad booqatid. Booqashada gurigu waa fursad aad guriga ku arki kartidd si aad u ogaatid in uu gurigu yahay mid kagu haboon.

Waxaa kale oo ey tahay fursad aad kula kulmi kartid qofka guriga iskaleh ama wakiilka guriga si aad u ogaatid in ey yahiin dad aad la macaamili kartid iyo inkale. Sidoo kale waa fursad qofka guriga iskaleh ama wakiilku uu ku ogaan karo in aad tahay qof ey la macaamili karaan iyo inkale. Ogow in kulankaanu yahay kii ugu horeyey oo adiga iyo dadka guriga iska-leh idin dhexmara, sidaas darteed aad ayey muhiim u tahay in ey fekrad wanaagsan kaa qaataan.

c. Caafimaadka iyo Abniga

Buuxi foomka caafimaadka iyo abniga oo ku lifaaqan buugan si aad u ogaatid in uu gurigu yahay mid kagu haboon iyo inkale. Tanu maha mid balan-qaadeysa in abniga gurigu yahay mid sugan laakiinse waxa uu kuu sheegayaa waxyaabaha aad u baahan tahay in aad fiirisid.

- Haddii uu gurigu yahay mid qalabeysan (fadhiga, jiiska, miisask iwm) fiiri in ey alaabtu tahay mid u adkeysan karta debka iyo inkale. Alaabta cusub oo dhan sida fadhiga, kuraasta iyo birta hoose ee sariirta, waa in ey ahaadaan kuwa u adkeysan kara debka. Fiiri qoraalada la socda. Waa in aad iska fiirisaa alaabta sida joodariyaasha, sariirta madax'yadeeda, kuraasta qadada, fadhiga, iyo

barkimaha. Haddii qoraal cadeynaaya uusan ku qoreyn alaabta, weydii qofka guriga iska-leh

- Haddii gurigu leeyahay qalabka wax lagu kariyo oo isticmaala gaas, waa sharci ah in qofka guriga iska-leh ama wakiilku uu fiiriyaan abniga alaabta sanadkiiba mar. Waxa aad qofka guriga iska-leh weydiisan kartaa shahaado cadeyneysa in baaritaan lagu sameeyey sida shahaadada loo yaqaan CORGI gas certificate. Haddii uusan qofka guriga iska-lehu uusan ku tusin shahaado cadeyneysa, la hadal Kooxda qaabilsan guryaha dadweynaha ee loo yaqaan ‘private housing team’. Waxaa kale oo wanaagsan in aad weydiisid qofka guriga iska-leh ama wakiilka shahaado cadeyneysa in baaritaan lagu sameeyey korontada iyo aaladaha kale laakiinse ogow tanu qasab kuma aha in qofka guriga iska-leh ama wakiilku ey baaritaan ku sameeyaan.

Waxaa wanaagsan in ey maalin tahay marka aad guriga booqaneysid si aad si wanaagsan ugu aragtid guriga. Waxa kale oo wanaagsan in uu qof kula socdo markii aad guriga booqaneysid si aad u heshid fekrad kale.

d. Shahaadada Tamarta (energy)

Haddii aad guriga degtay, kadib 1October 2008, waa sharci in qofka guriga iska-lahu ku tusaa shahaadada cadeyneysa in Tamartu (energy) shaqeyneyso. Shahaadada waxaa ku qoran qiimeynta tamarta-haddii qiimeyntu sareyso, waxtarka tamarta ayaa badan taas oo ka jaban shidaalka. Haddii qofka guriga iska-lahu uusan ku siinin shahaadada, la xiriir Kooxda Guryaha Dadweynaha (Private Housing Team) taas oo ah mid lagu ganaaxi karo, haddii qofka guriga iskalahu uusan heysan.

Haddii aad u baahan tahay faah-faahin dheeraad ah oo ku saabsan shahaadada Tamarta, la xiriir boga cumbuutarka ee Bulshada iyo Dowlada Deeganka (Communities and Local Government)

e. Xaafada, Kirada aad awoodid, qalabeynta Guriga iyo heshiishyada

Waxa aad sameyn kartaa liis kuu qaas ah oo kaa caawima:

- **Kirada:** ma adigaa iska bixinaaya kirada iyo biilasha, mase dowlada ayaa kaa bixin doonta?. Aad ayey u dag tahay in aad ogaatid qarashka guriga ku baxaaya adigoo weli degin, hase yeeshee, waxa

aad wareysan kartaa qofka guriga iska-leh ama qofkii horey u deganaa

- **Xaafada:** xaafadu matay mid ku qalanta? Dukaamo iyo meel basku istaago ma u dhowdahay?
- **Alaabta guriga:** guriga alaabu ma taalaa mase ma taalo? Gurigu ma la'eg yahay alaabta aan horey u heystay? Haddii aan guriga alaabu aalin, ma gadan karaa? Waxaa laga yaabaa in lagaa caawimo lacag aad ku gadatid alaabta guriga sida qaboojiyaha iwm.
- **Nooca heshiiska:** hubi nooca uu heshiisku yahay. Haddii aad guriga dad badan ku kireysatiin, 'gow masuuliyada waa idan wada saran tahay'. Waxa arintaan loola jeedaa- haddii qof kireystayaasha ka mid ah uusan bixin karida, dadka kale ee guriga wax ka degan ayaa u qoolan. Waxaa kale oo laga yaaba in uu heshiiska gurigu noqdo mid waqti go'an leh sidaas darted waa in kireystayaashu hubiyaan in ey mudada heshiiska ka bixin karaan iyo inkale. Waxaa kale oo wanaagsan in aad ka fekertid wixii dhici kara inta aadan saxiixin hehiiska sida – yaa laga doonayaa kirada haddii qof kireystayaasha ka mid ah go'aansado in uu guuro? Yey saaran tahay masuuliyada kireynta booska qofkii guuray – aniga mise qofka guriga iska-leh? Arimihahaas oo dhan waxa ey u baahan yahiin in laga feker. Mudada heshiiska ku qoran, waa mudada ugu yar ee aad guriga deganaan kartid.
- **Sigaar Cabida:** iska fiiri, haddii uu jiro qodob ku dhex jira heshiiska oo ka hadlaaya cabida sigaarka. Waxaa laga yaabaa in qofka guriga iska-lahu uusan rabin in sigaar lagu cabo guriga taas oo laga yaabo in ey keentay arimo la xiriira caafimaadka iyo abniga. Haddii uu heshiiska ku jiro qodob mamnuucaaya cabida sigaar, waxaa kireystaha qasab ku ah in uusan sigaar ku cabin guriga iyo daarta gudaheedaba. Sigaar cabidu waxa ey qayiri kartaa midababka kuraasta , derbiyada, safiinada iyo rinjiga albaabada. Sigaarku si sahlan ayuu u abuuri karaa deb, waana kan ugu weyn ee dhaliya debka guryaha ka dhasha.

Haddii aad sigaar ku cabto guri mamnuuc ka ah in sigaar lagu cabo, adigaa ayaa laga rabaa in aad nadiifisid daah'yada, fadhiga, kuraasta iyo roog'yada iyo weliba dayactirda safiinooyinka, derbiyada, dactalada miisaska iyo albaabada. Haddii aad sigaar cabidda ku sii wadidna, waxaa laga yaabaa in guriga lagaa saaro. Haddii aad tahay

sigaryo cab, waa in aad debada ku cabtaa adigoo weliba kala fogaanaaya albaabada iyo dariishadaha.

- **Cunsurinimada iyo isticmaalida:** ogow qofka guriga iska-leh looma ogola in uu kagu cunsuriyeeyo jinsiyada, nooca galmada, asalkaa, diinta, iyo cuur'yanimada. Dadka guryaha iska-lehu haddii ey guri ka kireyaan qof cuuryaan ah , waa in ey guriga ka dhigaan mid qof cuuryaan ahu ku noolaan karo. Inkastoo ey ku xiran tahay nooca gurigu uu yahay iyo waxyaabaha loo baahan yahay in la bedelo. Haddii aad talo u baahan tahay, waxaad wici kartaa telefoonka Xaafiiska Midnaanta iyo Xaquuqda Bini'aadanka.

Laanta Cuuryaaminta ayaa gacan ka geysan karta sidii uu qofka cuuryaanka ahu ula qabsan lahaa guri cusub laakiinse waa in ogolaasho laga helaa qofka guriga iska-leh inta aan guriga wax bedelin. Wixii macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa Xannaaneynta Tooska ah ee Bristol (Bristol Care Direct).

- **Guryaha la Qiimeyey:** Guryaha la qiimeeyey, waa guryo ey qiimeeyeen Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council) eyna u arkeen in ey yahiin guryo la degi karo. Dadka guryaha lahu waxa ey guryaha ku xayeysiin doonaan in ey yahiin kuwa la qiimeeyey ama waa in ey ku tusaan shahaadada markii aad fiirineysid guriga. Waxaa kale oo aad qiimeynta ka fiiri kartaa boga combuutarka. Wixii kale oo aad faah-faahin dheeraad ah ka heli kartaa kooxda guryaha dadweynaha (private housing team).

- **Shatiga Guryaha:** haddii aad tahiin sedex qofood ama ka badan oo aadna ku guureysiin guri ah sedex dabaq iyo wixii ka badan, gurigaas waxaa laga yaabaa in uu shati uga baahan yahay Golaha (Council). waxa qofka guriga iskalehu uu saxiixay sharciga guryaha lagu maamulo. Haddii gurigu shati u baahan yahay laakinse qofka guriga iskalahu uusan dalban shatiga, waxaa laga yaabaa in hantilaha la ganaaxo. la xiriir kooxda guryaha dadweynaha haddii ey kula tahay in gurigu uusan lahayn shati ama uusan gaarsiisneyn heerkii laga rabay amaba haddii aan la raacin xeerka guryaha.

Haddii Golahu (Council) baaraan guri oo ey ogaadaan in uusan lahayn shati, dadka guriga degan waxa ey xaq u leeyahiin in ey codsadaan in kiradaii ey bixin jireen dib loogu soo celiye. Haddii aad u baahatid faahfaahin ku saabsan arintaan, la xiriir kooxda guryaha dadweynaha (private housing team).

4. Maxaan sameeyaa kadib markaan guri jeclaado?

- **Haddii aad ku faraxsan-tahay Guriga**

Haddii aad heshay guri aad ku faraxsan-tahay, aadna ogtahay in aad bixin kartid kirada, balan la sameyso qofka guriga iskaleh si aad u dhameysiin arimaha loo baahan yahay oo dhiman. ogow, haddii aad guri kireysatid, marka aad ka guureysid waa in aad qofka guriga iskaleh ogeysiisaa ugu yaraan bil ka hor inta aadan guriga ka guurin, dibna u fiiiri sharuucda ku qoran heshiiska guriga gaar-ahaan qeybta ka hadleysa ka-guurida guriga.

Qeybta 2: waa maxay waxa ugu horeeya ee la sameeyo marka aad u guureysid guri cusub.

1. Heshiiska, Alaabta iyo dabaajiga

Inta aadan guriga degan, waxa qofka guriga iskalehu ku soo hordhigi doona heshiis lagaa rabo in aad saxiixdid. Waxa heshiiska ku qoran xaquuqda aad leedahay iyo masuuliyada ku saaran. Waa in aad aqrisaa inta aadan saxiixin. Adiga ayaa lagaa rabaa in aad bixisid kirada iyo biilasha kale, laga bilaabo taariikhda lagu heshiiyey ee waraaqda heshiiska ku qoran. Weydii qofka guriga iskaleh haddii ey jiraan qarash kale oo lagaa doonaayo sida dayactirida rooga ama nadiifinta guriga marka aad guriga ka guureysid.

Nooc'yada heshiis'yada

- **Heshiiska kireystaha ee mudada leh (Assured Shorthold tenancies)**

Nooca heshiisyada ugu badan waa heshiiska la yiraahdo Assured Shorthold tenancies (AST) oo ah mudo u dhexeeya 6 ilaa 12 bilood. Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council) waxa ey dadka ku dhiiri-geliyaan in ey saxiixaan mudo 12 bilood ah. Markii mudadu dhamaato, weli si sharci ah ayaad guriga ku degan tahay adigoo kirada u bixin doona sidii aad u bixin jirtay.

- **Heshiiska aan mudada lahayn (Contractual Periodic Tenancies)**

Heshiiskanu waa mid aan waqti lahayn, waxuuna noqon karaa mid qoraal ah ama af ah. Waa heshiis loo joojin karo waqtigii la doono, waxa eyna ku xiran tahay waqtiga kirada. Tusaale ahaan, haddii kirada la bixiyo bishiiba mar, waxaa heshiisku dhamaan karaa markii markii bishu dhamaato.

- **Heshiiska la yiraahdo Excluded letting**

Waa marka qofka guriga iskalahu uu guriga wax ka degan yahay, sada heshiis'yada kaleba waa in aad aqrisaa waxa ku qoran heshiiska si aad u ogaatid masuuliyada ku saaran.

- **Sharci iyo heshiis damaanada leh (Regulated and Assured tenancies)**

Haddii aad guriga degtay ka hor 1989, waxa aad tahay kireysta sharciyeysan oo heshiis damaanadeedleh laakiin haddii aad guriga degtay inta u dhexeysa 1989 ilaa 1977, waxaad aad tahay kireyste heshiis damaanadeed leh. Waxa ey labadan heshiis leeyahiin sharciyo kala duwan , waxaana wanaagsan in aad fahantid sharciyada ku qoran heshiiska. Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ahna kala xiriir boga combuurtarka ee la yiraahdo 'shelter website 'ama xaafiiska la yiraahdo Citizen Advice Bureau.

Liiska Alaabta

Waxa aan kagu dhiiri-gelineynaa in aad iska fiirisid, saxiixidna liiska alaabta. Liiska alaabtu waa waraaq cadeyneysa xaalada ey alaabtu guriga taalaa ku sugan tahay iyo inta ey tiradeedu la eg tahay si aad markii aad guriga ka guureysid aad dib u fiirisid liiska. Haddii aad saxiixdid waraaqda, waxa aad ogolaatay wax kasta oo waraaqdaas ku qoran marka iska hubi in waxa waraaqda ku qorani ey sax yahiin iyo inkale. Haddii qofka guriga iskalehu uusan ku siin liiska alaabta, adigu sameyso liis kuu qaas ah, una dir qofka guriga iskaleh si uu u saxiixo. Waxa aan halkaan ku soo lifaaqnay koobi ah sida ey waraaqda liisku u eg'yahiin. Waxaa kale oo wanaagsan in aad sawir ka qaadid guriga oo aad ku lifaaqdid waraaqda liiska si aad u heysatid wax cadeynaaya xaalada uu gurigu ku sugnaa markii aad u soo guurtay. Waana in aad heystaa wax cadeynaaya marka sawirka aad qaaday sida taariikhda iyo waqtiga.

Dabaajiga

Sida caadiga ah waxa lagaaga baahan yahay dabaaji. Haddii ey kiradaadu bilaabtay 6 Abril 2007 ama kadib, waxa qofka guriga iskaleh waajib ku ah in uu dabaajiga u dhiibo Laanta Qorshiyenta Dabaajiga. Waxa kale oo waajib ku ah qofka guriga iskaleh in uu kuu sheego nooca qorsheynta ee dabaajigaada lagu keydiyey. Haddii ey kula tahay in aan dabaajigaada la keydin, waxa aad dacwad u gudbin kartaa maxkamad. Maxkamada ayaana xakumi karta in qofka guriga iskaleh k uu soo celiyo dabaajiga iyo in loo dhiibo Laanta Qorshiyenta Dabaajiga. Wixii kale oo faahfaahin ahna, waxa aad kala xiriiri kartaa ururka la yiraado ‘Shelter’ ama fiiri boga combuutarka ee Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council) ama boga kale ee la yiraahdo ‘Direct Gov website’

Guryaha la wadaago

Haddii aad degto guryaha leyla-wadaago ama aad degtiin adinkoo koox ah oo aan isku qoys ahayn, waxa aad tihiin dad ey masuuliyada gurigu wada saaran tahay. Waxaa masuuliyad ka mida haddii qof guriga degan uu bixin waayo kirada, waxa sharci ahaan kirada oo dhan laga rabaa dadka kale oo guriga la-degan.

2.Kirada, Manaafacadka Guryaha iyo

Canshuurta

Haddii aad dooneysid in aad qaadatid manfaca guryaha iyo canshuurta, waa in aad marka hore codsataa manaafacaadka inta aadan guriga u guurin ugu yaraan todobaadka ka hor inta aadan guriga u guurin, maadaama, manaafacaadka laga bilaabo isniinta kadib marka foomka codsigu soo gaaro xaafiska. Haddii aad codsiga la soo daahdo, waxa laga yaabaa in aan manfaca lagaaga bilaabin taariikhda aad guriga soo degtay. Ogow manfaca guryaha waxa loo diraa qofka guriga kireystay, waxaana la soo diraa laba usbuuc kadib marka bishu dhamaato. Waa in aad heshiis la gashaa qofka guriga iskaleh sidii aad kirada u bixin lahayd. Waxaa manfaca laga bilaabaa taariikhda aad guriga u soo guurtid sidaas darteed waa in aad guriga u guurtaa taariikhda heshiiska kuugu qoran.

Sida loo codsado

Waxaa jirta siyaabo badan oo aad u codsan kartid Manaafacaadka Guryaha. Waxa aadna ka heli kartaa boga combuutarka ee Golaha (Council), xaafiiska macaamiisha ama in aad wacdid ama u qortid waraaq xaafiiska macaamiisha adigoo codsanaaya in foomka laguu soo diro. Sida loola xiriiri karo waxa ey ku qoran tahay meesha ugu dambeysa buugan.

Waa in aad heysataa heshiiska guriga, aqoonsi, cadeyn ah dhaqliga ku soo gala iyo haddii uu jiro keyd meel kuu yaala. Waxa aad faahfaahin dheeraad ah ka heli kartaa foomka codsiga.

3. Sidii aad dadka ugu sheegi lahayd in aad guri cusub u kuurtay

Gunada iyo manaafacaadka shaqsiga ah

Haddii aad qaadatid manafacaadka loogu tala-galay dadka shaqada raadinaaya (Jobseekers' Allowance) ama manaafacaadka loogu tala galay dadka aan caaafimaadkoodu xun yahay (incapacity benefit), waa in aad wacdaa Waaxda Shaqooyinka iyo Howl-gabka. Haddii aad qaadatid gunada qoysaska shaqeeya (working families tax credit) ama aad qaadatid manafacaadka caruurta (Child Tax Credit), wac xaafiiska canshuuraadka (Inland Revenue).

Biilasha

Waxa aad u baahan tahay in aad iska xaadirid Shirkada la yiraahdo Wessex Billing Service. Ogow biilka biyahu, waxa uu kuula ekaan doonaa mid badan, maadaama sanadkiiba mar la soo diro. iska fiiri nambarka miterka biyaha, una sheeg shirkada marka aad guriga u soo guurtid.

Waxaa kale oo aad u baahan tahay in aad nambarka meterka siisid shirkada korontada iyo gaaska, una sheegtid in aad guri cusub u guurtay. Haddii aadan hubin shirkada korontada iyo gaska, waxaa aad la xiriiri kartaa shirkadahan National Grid iyo Western. Waxa fiican in aad nambarka miterka diwaan gelisid ayadoo qofka guriga iskalahu uu goob-joob ka yahay.

Haddii guriga leeyahay fure koronto, la hadal shirkada si ey magacaada ugu soo wareejis. Haddii aadan fure heysan, la xiriir shirkada si ey fure kuu siiso. Ha isticmaalin furaha ey dadkii hore u deganaa ka tageen adigoo marka hore la hadlin shirkada sababtoo ah waxa laga yaabaa in deyn lagu lahaa, waana adag tahay in dib loo saxo mar haddii la isticmaalo furo deyn lagu lahaa.

Waxa wanaagsan in aad weydiiso qofka guriga iskaleh meesha ey ku yaalaan fiyuuska korontada iyo meesha biyaha laga xiro si aad u ogaato haddii arin qatar ahu ku soo food-saarto.

Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council)

Waa in aad u sheegtaa xaafiiska Golaha Canshuurta (Council Tax) in aad guri cusub degtay. Haddii aad kaligaa ku nooshahay, hubi in aad u sheegtid xaafiiska canshuurta sababtoo ah waxaa laga yaabaa in lagaa dhimo canshuurta. Dadka qaarkiis sida arday skuul dhigta maalin kasta lagama rabo in uu canshuur dhiibo. Haddii ey kula tahay in lagaa dhaafo canshuurta oo aan xaq laguugu lahayn, fadlan la xiriiir xaafiiska Canshuurta.

Xaafiiska Canshuurta waxa uu kuu soo diri doonaa biil iyo foomka ka qeyb-qaadashada doorashada. Haddii aadan foomka helin, waxa aad waci kartaa xaafiiska Adeega Dorashooyinka si ey kuugu soo diraan. Haddii aad codeyn kartid, waxa foomkanu kuu ogolaanayaa in aad codeyn kartid. Haddii aad qaadatid manfaca guryaha, waa in aad ogeysiisaa Waaxda Manafacaadka Guryahayin aad guurtay, una sheeg ciwaanka cusub.

Shatiga TV

Haddii aad shati horey ugu lahayd ciwankii hore, waa in aad wacdaa xaafiiska shatiga TV si ciwaanka cusub laguugu soo bedelo. Haddii aadan shati lahayn, oodna rabtid in aad TV fiirsatid, waa in aad shati gadataa. Haddii ey guriga dad kale kula degan yahiiin oo aad iskula qoran tahiiin heshiiska, waxa leydin ka rabaa hal shati laakiinse haddii heshiis'yadu kala duwan yahiiin, heshiiskastaba waxaa laga rabaa hal shati. Haddii aadan gadan shati, waa lagu ganaaxi doonaa.

Ceymiska

Adiga ayey kagu xiran tahay in aad gadatid ceymis iyo inkale si aad uga hortagtid xatooyada iyo halawka alaabta. Haddii aad horey ceymis u lahayd, waa in aad u sheegtaa si ey ciwaanka kugu bedelaan. Waxaa laga yaabaa uu qiimahu kor u kaco laakiinse waxa ey ku xiran tahay xaafada aad degan tahay.

Alaabta guriga

Haddii aadan heysan alaabta guriga, waxa laga yaabaa in ey ku caawinto shirkada la yiraahdo Sofa project ama Emmaus. Waxa ey gadaan alaab qiimahoodu jaban yahiiin, waxaa kale oo ey alaabta u hubiyaan dadka dhaqligoodu yar'yahay

Haddii aad qaadatid manfaca income support ama income based job seekers Allowance, waxaa laga yaabaa in aad manfac kale ka heshid Waaxda Shaqada iyo Howl-gabka.

5. Qashinka iyo Dib u warshadeynta

Haddii aad degan tahay Magaalada Bristol, adigaa ka masuul ah qashinkaada.

Waxaayabaha aad ka masuulka tahay waxaa ka mida:

- In aad aruurisid alaabtaada todobaadka oo dhan
- In aad qashin welbaba ku ridid meesha laguugu tala galay
- In aad fuustada qashinka dhigtid gurigaada banaankiisa 7:00 subaxnimo
- In aad fuustada qashinka ku celisid meesha loogu tala galay kadib marka qashinka laga bixiyo

Meesha qashinka laga qaado

Inta badan guryaha Bristol ku yaala waxa ey leeyahiin meel qashinka laga qaado markii laga reebo daaraha dheedheer. maalmaha qashinka laga qaado xaafadaada weydii Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council) ama ka fiiri boga combuutarka.

Dib u warshadeynta

- **Santuuqa Madow**

Maxaa lagu ridaa: waraaqa oo dhan (sida waraaqaha, joornalada, buugagta iwm. Waxaa kale oo lagu ridaa dhalooyinka, gasacyada, dharka, kobaha, maqaarka, muraayadaha indhaha iyo beteriga baabuurta.

- **Caagaga u sameysan sida dhalada:** ma laga qaadi doono Santuuqa Madow. Haddii aad ku rido santuuqa madow waa looga dhex-tegaa
- **Cartoonada** waxaa isku meel lagu ridaa cuntada, fadlan haku ridin santuuqa madow.

Haddii ey suurta gal tahay isku day in aad nooc kastaba ku ridid cartoon gooni ah oo kala qeybinaaya. Wixii aan geli karin santuuqa, ku rid bacyaasha wax lagu qaado oo afka ka xiran.

Raashinka la tuuro iyo Cartoonada

Waxaa lagu ridaa: cuntada la kariyey iyo cuntada aan la karin.

Hubi in aad heysato caaga weyn ee qashinka oo banaanka la dhigo iyo mid yar oo kushiinka aad dhigatid si aad qashinka ugu ridid. Caaga kushiinka, waxa wanaagsan in aad marka hore bacda qashinka ku xirtid, kadibna aad

joornaal ku firaashtid si uusan qashinku ugu gudbin hoos. Haddii caaga qashinka ee kushiinku buuxsamo, ku gedi caaga weyn ee qashinka oo banaanka yaala. Ka ilaali caaga-weyn ee qashinka in qoraxdu si toos ah ugu dhacdo taas oo keni karta in qashinku dhalaalo, kadibna uu soo uro, waana in aad afka ka xirtaa si aan urku debada ugu bixin.

Maalinta qashinka la qaadaayo, caaga weyn ee qashinka raashinka ah iyo kortoonyada isbarbar dhig laakiinse cartoonada go'go'an waxa aad ku ridi kartaa caaga-weyn ee qashinka raashinka lagu rido.

Fadlan la xiriir Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council) haddii aad dooneysid Santuuqa Madow ee qashinka, Caaga Weyn ee qashinka ama caaga yar ee qashinka ama haddii aad qabtid wax su'aal ah ee ku saabsan sida loo isticmaalo caagaga amaba aad ka dacwooneysid adeega.

Qashinka Guryaha ku yaala daaraha

Xarumaha qashinka ee guryaha daaraha ku yaalaahu waa kala duwan yahiin. Guryaha qaarkood waxa ey leeyahiin xarun-qashin oo lagu aruuriyo waraaqaha, dhalooyinka iyo gasacyada iyo raashinka oo ayaga qaas u ah.

Caagaga waaweyn oo lugaha leh

Caagaga lugaha leh waxaa loogu tala galay qashinka aan dib loo warshadeyn sida sharootooyinka caaga ah ee wax lagu xirto iyo saxuunta caagaga ah. Waa in aad dabooshaa, mana la qaadi doono qashinka aan caaga ku dhex-jirin. Haddii aadan heysan caaga qashinka ee lugaha leh, waxa lagu ogol-yahay in aad dhigto ugu badnaan afar bac oo keliya maalinta qashinka la qaadaayo. Haddii aad tihiin qoys badan, la hadal Golaha (Council) waxa laga yaabaa in aad xaq u yeelatiin caag kale. Waa masuuliyadaada in aan qashinku ku daadan wadooyinka.

Adeegyada kale ee ka shaqeeya qashinka

La xiriir Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council) ama fiiri boga combuutarka ee Golaha (Council) haddii aad u baahatid macluumaad dheeraad ah.

Waxaa jira adeegyo meel ku rida qashinka beeraha, qashinka alaabta waaweyn (fadhiga, kuraasta) iyo qashinka daawooyinka.

Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council) wey ku caawimi kartaa haddii aad tahay cuuryaan oo aad u baahan tahay in gacan lagaa siiyo sidii aad u diyaari lahayd qashinka.

Adeegyada kale ee dib u warshadeynta

La xiriir Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council) ama fiiri boga Golaha (Council) haddii aad u baahatid macluumaad dheeraad ah.

Waxa Magaalada Bristol ku yaala 40 xarumood oo la geyn karo alaabooyinka la tuuro ama dib loo warshadeeyo oo ey ka mid yahiin alwaaxyada, alaabta korontada, alaabta kiimikada ah iyo qashinka guryaha.

Qeyb 3: Mudada aad ku nooshahay guriga

1. Bixinta biilasha iyo kirada

Adigaa ka masuul ah bixinta kirada iyo biilasha laga bilaabo maalinta aad guriga kireystay. Haddii aadan bixin kirada iyo biilasha maalinta lagu heshiyey, waxa ey halis ku noqon kartaa sii deganaashadaada guriga. Marnaba ha isku deyin in aad kirada u diidid qofka guriga iskaleh. Haddii aad diidid in aad kirad bixisid, qofka guriga iskalahu waxa uu kagu dacweyn karaa maxkamada.

Haddii aad tahiin koox guri wada kireystay ee qof adinka ka mid ahu uu kirada bixin waayo, waxa kirada oo dhan laga rabaa intiina kale.

Haddii aad guriga ku degan tahiin dad badan, waxa biilasha guriga laga rabaa dadka ama qofka magaciisu ku qoran yahay. Haddii qofka mid ah dadka guriga degan uusan bixin biilka, waxa u qoolan dadka kale ee guriga degan.

Haddii aad qaadatid Manfaca Guryaha, waxaa loogu tala galay in lagu bixiyo kirada oo keliya ee looguma tala gelin in lagu bixiyo bilaal kale.

2. Kuleylka iyo Qaleyka guriga

Tan ugu horeysa ee ka caawinta in uu gurigu kulul ahaado waa marka aad ka ilaalisid qoyaanka. Qoyaanka waxaa keena uumitada taas oo ka dhalata marka hawo kulul iyo meel qabow kulmaan sida derbiga iyo hawo qobow. Uumitadu ma'aha halis hasa'yeeshee waxa ey keentaa bolol taas keeni karta caafimaad xumo. Waxa kale oo ey keeni kartaa in ey daxalo u yeesho dariishadaha hareeraheeda. Ogow adiga ayaa masuul ka ah daryeelida guriga inta aad ku nooshahay, adigaana u qoolan dactirtida guriga haddii aad adigu masuul ka tahay halaabida guriga.

Waxaa jira waxyaabo yar-yar oo aad sameyn kartid si aad u yareysid uumitada iyo bololka guriga.

Kululeynta (Heating)

Inta badan uumitada waxaa keena qobowga. Waxaa wanaagsan in aad kululeysid qolalka aan la seexan ama aad xirtid albaabada. Xir- xirida guriga waxaa ey yareysaa dhaxaleysiga.

Haddii aadan heysan kululeysada dhexe (central heating), isku day in aadan isticmaalin kululeysada bareesada la geliyo oo gacanta lagu qaato sababtoo ah waxa ey sii deysaa qoyaan badan. Kululeysada gacanta lagu qaato, ha ugu tegin guriga ayadoo shidan.

Haddii aad qaadatid manaafacaadka guryaha, waxa laga yaabaa in aad xaq u yeelatid in bilaash lagu geliyo kululeysada dhexe. La xiriir ururka la yiraahdo WarmFront -wixii faah-faahin ah.

Ka-yarey qoyaanka kushiinka:

Marka aad wax karineysid dobool digsiyada, haku shubin biyo badan, debkana ka yarey. Xir albaabka kushiinka si aan uumitadu ugu bixin guriga intiisa kale. Haddii ey jirto marawaxo qiiqa qaada, shid.

Mushqusha

Mushqusha haku daadin biyo. Biyaha dhulka lagu daadiyaa waxaa ey dhibaato u geystaan sagxada musqusha. Aad ayey qaali u tahay dactirka mushqusha sidaas darteed waxaa laga yaabaa in adiga laguugu dalaco qarashka ku baxa dayactirka.

Hubi in daaha musqushu ku jiro waaskada dhexdeed marka aad qubeysaneysid, waana in aad dhigtaa musqusha roog qoyaanka celiya, waan in aadan biyo ku firdhin musqusha hareera-heeda.

Waa in aad xirtaa albaabka mushqusha, dariishadana aad furtaa marka aad qubeysaneysid si ey uumitadu u baxda. Haddii marawaxo ku taalo musqusha, waa in aad shidaa.

Hawo Qaashada

Isku day in aad furtid dariishada musqusha iyo kushiinka marka aad isticmaaleysid, kadib markaad isticmaashana waa in ey furnaataan ugu yaraan 20 daqiiqo. Fur dariishadaha wax yar, xataa qolalaka jiifka si howo cusub ey u soo gasho guriga laakiinse ogow waxa keliya oo aad sameyn kartaa sidaan marka uu abnigu sugan yahay.

Qalajinta Dharka

Hadii ey suurta gal tahay, dharka ku qalaji banaanka. Haddii ey lagama maarmaan in aad dharka ku qalajiso guriga gudahiisa, haku werin kululeeyaha korkeeda guriga. Dharka ku wer biraha dharka lagu qalajiyo, dhigna mushqusha dhexdeeda haddii ey suurta gal tahay, dariishadahana fur si hawo u soo gasho.

Waxyaabaha kale oo aad sameyn kartid

Haddii uumitada darbega qabsata iyo bololka aad u taag weyso, oo talooyinka kor qorana ey ku shaqeyn waayaan , waa in aad la hadashaa qofka guriga iskaleh. Waxaa kale oo ku caawimi kara mashiinka uumitada bixiya.

Abniga

Adiga ayaa masuulada gurigu ku saaran tahay inta aad ku nooshahay. Qofka guriga iskalehna waxa masuuliyad ka saaran tahay in uu guriga albaabyo xirmaaya u sameeyo, kuna siiyo furayaal aad ku xirto.

Yareynta Xatooyada

Arinta ugu wanaagsan ee xatooyada hoos loogu dhigi karaa waa in la xiro albaabyada iyo dariishadaha. Hubi in ey xiran yahiin inta aadan guriga ka bixin. Xataa marka aad guriga joogtid albaabku haku xiraado. Waxaa kale oo wanaagsan in aad xirto dariishadaha qolalka aan lagu jirin. Xatooyadu aad ayey u badan yahay guryaha, waxaana keena dariishada iyo albaabada laga tago ayagoo furan.

- Mid ka mida furyaasha meel debada ah haku qarin. Waa meesha ugu horeysa ee tuugadu ka fiiriso.
- Waxaa wanaagsan in aad weydiisato in qunfulada iyo furyaasha lagu bedelo marka aad guri cusub ku guurtid.
- 2/3 tuugada waxa ey guriga ka soo galaan dariishadaha iyo albaabada gambe sidaas darteed aad iyo aad u hubi in ey xiran yahiin. Waxa kale oo sahlan in laga soo galo dariishaha guriga korkiisa ku yaala sidaas darteed hubi in ey xiran yahiin.
- Hubi in dariishadahaada si sahlan looga arki karo wadooyinka si loo arko tuugada. Jar haddii ey geedo ku aadan yahiin dariishada.
- Ku samey albaabka guriga muraayad yar oo laga arki karo qofkii soo gaaraca. Haka furin albaabka haddii aadan hubin qofka uu yahay.
- Ha dhigin furaha meel u dhow albaabka sababtoo ah waxa tuugidu ey furaha ku soo qabsadaan birta danabkaleh oo wax soo jiidata.
- Haddii ey suurta gal tahay isticmaal qunfulada la yiraahdo Mortice deadlocks. Mortice deadlocks waa qunfulo aan guriga gudahiisa laga furi karin oo markastaba u baahan fure. Tusaale ahaan haddii uu

tuugo ka soo galo dariishada kama bixi karo albaabka ilaa uu fure helo mooyee.

- Jayga guriga hareerahiisa lagu daadiyaa, waa celiyaan tuugada maadaama uu jaygu shanqaro markii lagu dul socdo. Waxaa kale oo wanaagsan in aad qodxo bir ah aad ka taag taagtid bowdka kaas oo ku siin kara abni kale.
- Isticmaal nalalka iftiinkoodu uu qafiifka yahay si aad koronto yar u isticmaashid.
- Waxa aad gada kartaa mashiinada la yiraahdo timer swiches kuwaas oo nalka kuu daraaya, kuuna daminaaya marka aad guriga ka maqan tahay si uu tuugo ugu maleeyo in aad guriga joogtid. Waxaa kale oo aad la hadli kartaa deriskaada ama qof saaxiibkaa marka aad fasax u baxeysid si ey guriga kuugu ilaaliyaan inta aad maqan tahay.
- Hubi in aad xirto haddii uu jiro qol banaanka ku yaala oo aad u isticmaashid maqsin ahaan.
- Waxaa aad ka diwaan gelin kartaa boga combuutarka www.immobilise.com alaabta modal numbarka leh sid telefoonka, combuutarka iyo Tv, kaas oo si toos ah ugu xiran booliska. Tusaale ahaan haddii alaabta lagaa xado ee boolisku qabtaan, waxa boolisku ogaan karaa in aad adigu alaabta leedahay.
- Baabuurta xir kuna xarey garaash haddii uu jiro.
- Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah, waxa aad kale xiriiri kartaa ururka la yiraahdo Neighbourhood Watch Scheme ama fiiri boga ururka Crime Reduction.

Dadka guriga iska soo gala iyo martida

Sida sharcigu dhigaayo waxa aad difaaci kartaa ilaa xad nafsadaada, dadka guriga kugula nool, martida iyo hantidaada. Awooda aad u isticmaasho waxa ey ku xiran tahay qatarta ku soo food saarta. Tusaale ahaan, awooda aad u isticmaali kartid in aad naftaada ku difaacdid, waa ka baaxad weyn tahay markii aad hantidaada difaaceysid. Sharcigu ma ogola ka'aarsasho. Ciqaabida qof tuuga ah, waa shaqo ey maxkamadu leedahay ee ma'aha in aad adigu sharciga gacantaada ku goosatid haddii tuug ow dembi ka galo nafsadaada, qoyskaada ama saaxiibadaa.

Xeerka masuuliyada kireystaha ee soo baxay 1957 iyo 1984 waxa uu dhigayaa in kireystaha ey saaran tahay abniga dadka guriga la degan. Sharciga qeybta hore wax ey ka hadleysaa martida, qeybta dembana waxaa ey ka hadleysaa dadka guriga iska soo gala. Kireystaaha waxa masuul ka saaran yahay dadka martida u ah.

Sharci ahaan dadka gurigaada soo galaa ama haku yimadaan marti ama tuugnimo, waxa ey kagu dacweyn karaan maxkamada shacabka haddii ey gurigaada ku dhawac maan.

4. Waxtarka korantada

haddii korontada gurigaadu eysan si wanaagsan u shaqeyneyn, uma fiicna caafimaadka iyo biilka guriga. Haddii aad qaadatid manfacyada dowlada, waxaa aad ka codsan kartaaa ururka la yiraahdo 'Warm front' in ey bilaash kuugu hagaajiyo korontada, tubooyinka hawada qaada iyo daboolida meelaha duleela. Inta aadan guriga wax ka bedelin, waa in aad ogolaasho ka hesho qofka guriga iskaleh. Xataa haddii aadan qaadan manafaacaadka dowlada, waxa laga yaabaa in aad gargaar heshi. la xiriir Xarunta Talooyinka Koranta wixii ku saabsan gargaarka laga heli karo xaafada aad degan tahay.

5. Abniga Gaaska

Waxaa qofka guriga iskaleh masuuliyad ka saaran tahay in uu baaro aaladaha gaaska sanadkiiba mar. Haddii aadan hubin in la baaray iyo inkale, la xiriir qofka guriga iskaleh, weydiisana in uu ku siiyo koobi cadeynaaya in baaritaan lagu sameeyey.

Waa in aad u sheegtaa sqofka guriga iskaleh ama shirkada ka masuulka ah wixii dhibaato ah oo aad ku aragta qalabka gaaska. Haddii aad aragtid eynin qaar ka mid ah aaladaha gaasku eysan shaqeyneyn, ha isticmaalin.

6. Derisnimada

Haddii aad dhib ku qabtid dereskaada, talaabada ugu horeysa ee aad qaadi kartaa, waa in aad la hadashaa dereskaada si aad xal u heshiin. Haddii aad xal gaari weysiin, waxa jira ururo ku caawimi kara, waxaadna macluumaadkooda ka heli kartaa xaafiiska Adeega Macaamiisha (customers Service Point) ee kuu dhow.

Meesha aad gargaar ka heli kartaa:

Daqan-xumida

La xiriir ururka la yiraahdo 'It's Your Call' ama wac booliska (Avon And Somerset) haddii ey tahay arin deg deg.

Tubo Xiran

La xiriir Kooxda Guryaha Dadweynaha

Qeylada

La xiriir Kooxda qaabilsan qeylada ama buuqa (Noise Pollution Team)

Dooliga, jirka iyo Cayayaanka

La xiriir ururka cayayaanka (Pest Control)

Aruurinta Qashinka

Adeega Qashinka (Waste Services)

Waa waajib ku saaran in aad noqoto deris wanaagsan sidaas darteed mar kastaba ka feker deriskaada.

Qeylada

Codkaada hoos ku dhig-gaar ahaan maqribadii iyo habiinkii.

7. Masuuliyada ku Saaran

kireystaha waxa saaran musuuliyad, taas oo inta badan ku qoran heshiiska guriga. Inta ugu muhiimsan masuuliyada ee aad u baahan tahay in aad ogaatid waatan hoos ku xusan:

- Waa in aad bixisaa kirada iyo bilaasha guriga waqtiga lagu heshiis
- Waa in aad u sheegtaa qofka guriga iskaleh:
 - Wixii dayactir ah ee gurigu u baahan yahay sida ugu dhaqsaha badan-leh.
 - Wixii sharaxaad ah ee aad dooneysid in aad guriga ku sameysid. Haddii guriga ey wax ka halaaban oo aad adigu masuul ka tahay, qofka guriga iskalahu waxa uu qarashka lagu sameyey guriga uu ka goosan doonaa lacagta dabaajiga ah ee uu kuu haayo.
- Waxa kale oo laga yaabaa in aad masuulka tahay hagaajinta iyo dayactirka haddii ey jirto beer ku taal guriga. Hubi sharuudaha ku yaal heshiiska guriga.
- Adiga ayaa ka masuul ah wixii dhib ah oo ey keenaan dadka martida kuu ah sidaas darteed waa in aad hubisaa in eysan jebin sharuudaha ku qoran waraaqda heshiiska.
- Raac sharuudaha ku qoran waraaqda heshiiska. Tusaale ahaan, waa in aadan kensan guriga xayawaanaadka la xannaaneeyo iyo in aadan soo dejin qof aan hantilaha gurigu ogeyn. Haddii qofka guriga ikalahu uu kuu ogolaado in qof kula dego, oodna qaadatid manfaca guryaha, waxa laga yaabaa in manfacii aad qaadan jirtay uu isbedelo.

8. Masuuliyada saaran qofka guriga iskaleh iyo wixii aad sameyn lahayd haddii uussan ka soo bixin masuuliyada

Inta badan masuuliyada qofka guriga iskaleh waxa ey ku qoran tahay heshiiska guriga taas oo ah sharci aad labadiinuba aad saxiixdeen.

Arimaha hoos ku qoranu waxa ey sharaxayaan waxyaabaha lagaaga baahan yahay in aad ogaatid:

- Qofka guriga iskalehu ma soo geli karo guriga asigoon ku weydiin. Qofka guriga iskalahu waxa uu guriga soo geli karaa marka uu guriga dayactiraayo iyo arimaha kale oo ku qoran waraaqdaha heshiiska oo ey ka mid tahay marka uu qof guriga tusaayo laakiinse waa in uu waraaq kuu soo qoraa 24 saacadood ka hor intuuusan guriga qofna tusin. Haddii ey jiraan wax deg deg ah labadiina ayaa taas ka heshiin kara. Haddii qofka guriga iskalahu uu guriga iska-yimaado asigoon kuu sheegin, waxa loo qaadanayaa in ey tahay xumaato ow kagu kadeedaayo taas oo ah mid ka mida dembiyada. Haddii taasu kagu dhacdo, la tasho xafiiska Kooxda Xiriirka Kireystayaasha (Tenancy Relation Team) ama ururka la yiraahdo Shelter.
- Dadka guryaha iskalahu waa in ey raacaan sharciga markii ey doonayaan in ey guriga kaa saaraan, inkastoo ey ku xiran tahay nooca heshiiska aad heysatid. Haddii aad heysatid nooca heshiiska la yiraahdo Assured Shorthold Tenancy, waa in ey ku siiyaan ogeysiis (Notice Seeking Possession) ow ku cadeynaayo in uu rabo gurigiisa. Haddii aadan hubin in sharciga la raacay iyo inkale, waxa aad la xiriiri kartaa Tenancy Relation Team, Shelter ama Citizens Advice Bureau. Waxaa kale oo aad talo sharci weydiisan kartaa xarunta dhexe ee sharciga (Law Centre) oo Bristol iyo Avon kuwaas oo bixiya talooyin la xiriira xag sharciga. Ururka Adeega Sharciga (Legal Service Commission) ayaa faah-faahin kaa siin kara Garyaqaanada iyo ururada xaafadaada degan oo ku caawimi kara. Sida badan bilaash ma aha adeegan sidaas darteed marka hore hubi in dembi lagaa galay iyo inkale inta aadan garyaqaan shaqaaleynin.
- Qofka guriga iskalahu waa in uu hubiyaa in gurigiisu waafaqsan sida sharciga dowladu dhigaayo.
- Waxaa jira liis la raaco si loo hubiyo in abniga gurigu sugan yahay. Haddii aad dhibaato la kulanto, waxa aad u sheegi kartaa Laanta private housing teams laakiinse waxa wanaagsan in aad marka hore u sheegtid qofka guriga iskaleh wixii guriga ka haleysan.
- Waa in qofka guriga iskalahu ow guriga ku sameeyaa waqti maquul ah. Haddii ey guriga ka haleysan yahiin wax caafimaadka halis ku ahu, waa in lagu sameeyaa sedex maalmood gudaheed hase yeeshee haddii eysan halis ahayn, waxa ey qaadan kartaa ugu badnaan hal bil. Haddii qofka guriga iskalahu uusan raacin sharciga, la xiriir private housing Service.

9. Xiriirka kireystaha iyo Kireeyaha

Waxaa fiican in aad xiriir wanaagsan aad la leedahay qofka guriga iskaleh. Haddii ey kula tahay in qofka guriga iskalehu uusan fulineynin sharuudaha ku qoran waraaqda heshiiska, waxa aad la tashan kartaa ururka citizens Advice Bureau ama Shelter. Waxaa meesha ugu dambeysa warbixintaan ku soo lifaaqnay magac'yada ururada kaa caawimi kara arintaan.

Haddii aad arday tahay waxa laga yaabaa in aad talooyin ka heshid Xarunta Talooyinka Ururka Ardada

Qeybta 4aad: Ka-guurida guriga

1. Ogeysiiska ku saabsan ka guurida guriga

Haddii aad dooneysid in aad guriga ka guurtid, fiira sharuudaha ku qoran waraaqda heshiiska si aad u ogaatid mudada lagaaga baahan yahay in aad u sheegtid qofka guriga iskaleh. Haddii eysan jirin mudo kur qoran heshiiska, mudada caadiga ahu waa hal bil. Mudada waraaqda heshiiska ku qoran ayaa lagaaga baahan yahay in aad deganaatid guriga. Waxa keliya oo aad guriga ka guuri kartaa ayadoon mudadu dhamaan, haddii sharuudaha waraaqda heshiiska ku qoran la jebiyo ama in aad adiga iyo qofka guriga iskalehu aad ku heshiisaan. Sharci ahaan kama bixi katid guriga ilaa mudada waraaqda heshiiska ku qorani ey dhamaato. Waxa wanaagsan in aad koobi ka reebatid waraaqda aad ku wargelineysid hantilaha guriga in aad guirga ka guureysid. Haddii aad waraaqda ku direysid boostada, waa in aad rasiid ka qaadataa.

Haddii aad dooneysid in aad guurtid, isla markaasna aad rabtid in Councilku uu meel ku dejiyo, waa in aad marka hore la hadashaa Councilka inta aadan guurin sababtoo ah haddii aad guurtid adigoon Councilka u sheegin, Councilka waajib kuma noqoneyso in ey meel ku dejiyaan.

Adiga ayaa ka musuul ah bixinta kirada iyo biilasha inta aad guriga degan tahay, waana in aad bixisaa kirada bisha kuugu dambeysa guriga. Haddii aad diido in aad bixiso kirada, qofka guriga iskalahu waxa uu ku saari karaa maxkamad.

Waxaa wanaagsan in aad hubiso in qofka guriga iskalahu uu helay waraaqdii aad ku wargelineysid in aad guriga ka guureysid iyo inklae oo aad weliba isku afgarataan maalinta guriga kuugu dambeysa oo aad furaha ku wareejineysid.

Haddii ey qasab kagu noqoto in aad si deg deg ah guri kale ugu guurtid, oo ey waajib kagu noqoto in aad bixiso laba kiro (gurigii hore iyo kan dambe),

waxaa laga yaabaa in Xaafiiska Manaafacaadka Guryahu (Customer's Service Point) Notice Seeking Possession' ey kaa bixiyaan labada kiro mudo hal bil ah. Fadlan la xiriir Xaafiiska Manaafacaadka wixii faah-faahin ah.

2. Miterka guriga aad ka guureysid

Maalinta aad guureysid waa in aad qortaa nambarka korontada oo aad u sheegtaa shirkada korontada. Waxa kale oo lagaaga baahan yahay in aad shirkada u sheegta ciwaankaada cusub si ey kuugu soo diraan biilka ugu dambeeya ee gurigii hore. Haddii ey suurta gal tahay, waxa wanaagsan in qofka guriga iskalahu uu goob- joog ka ahaado marka aad nambarka korontada qoreysid.

Haddii guriga korontadiisu tahay fure, u sheeg shirkada marka aad guureysid si ey koronto cusub ugu bilaabaan qofka guriga soo degi doona. Waxa kale oo aad hubisaa in aad furaha korontada u dhiibtid qofka guriga iskaleh.

3. Heshiisyada kale

Haddii ey jiraan adeegyo kale oo aad isticmaashid sida cable ama satellite TV, waa in aad shirkada ogeysiis siisaa. Haddii aad shirkada kula jirtid adeeg aan waqtigiisu dhamaan, la tasho shirkada sida ugu sahlan ee aad u wareejin kartid.

4. Bedelida Ciwaanka iyo Boostada

Waa in aad u sheegtaa shirkadaha in aad guurtay.

a. Gunada iyo Manaafacaadka Shaqsiyaadka

Haddii aad qaadatid manafacaadka la yiraahdo income Support, Jobseekers' allowance ama Incapacity Benefit, waa in aad u sheegtaa Waaxda Howl-gebka ee loo yaqaan DWP in aad ciwaan cusub degtay. Haddii aad qadatid manfaca Working Tax Credit ama Child Tax Credit, waa in aad u sheegtaa Waaxda Inland Revenue ciwaankaada cusub.

b. Biyaha

U sheeg Shirkada biyaha ee Bristol Wessex in aad degtay ciwaan cusub oo aad gurigii hore ka guurtay.

c. Shatiga TVga

Waa in aad u sheegtaa waaxda shatiga TV in aad ciwaan cusub u guurtay si ey shatigaada ugu bedelaan ciwaanka cusub. Haddii aadan saas sameyn, waxaa laga yaabaa in lagu ganaaxo.

d. Ceymiska

Haddii aad ceymis leedahay waa in aad u sheegtaa ciwaankaada cusub si ey u diwaan geliyaan ciwaankaada cusub.

e. Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council)

Haddii aad qaadatid Manfaca Guryaha iyo Canshuurta waa in aad u sheegtaa ciwaankaada cusub oo aad gurigii hore ka guurtay.

f. Xaafiska Boostada

Waxa aad xaafiiska Boostada weydiisan kartaa in ey ciwaanka kuu bedelaan laakiinse waa lacag oo bilaash ma aha.

5. Dabaajiga

Haddii dabaaji lagaa qaaday markii aad guriga soo degtay, waa in kuligiis ama qeyb ka mida lagu soo celiyaa marka aad guriga ka guurtid. Waxa qofka guriga iskalahu uu lacagta dabaajiga ah ka goosan karaa wixii aad guriga ka haleysay intii aad deganeyd laakiinse ma aha in laguugu dalaco wixii hore y u haleysnaa.

Waa in xaalada guriga gudahiisa iyo debadiisuba ahaato sidii ey ahayd markii aad kireysatay. Tixraac oo dib u fiiri waraaqda lagu xisaabiyey alaabta markii aad guriga u soo guurtay. Waa in guriga debadiisa iyo gudahiisuba ahaato nadiif oo aadan uga tegin wax qashin ah.

Lacagta dabaajiga ahu waxa ey kaa maqnaan doontaa mudada ow qofka guriga iskalahu baaraaayo xaalada uu gurigu ku sugan yahay asigoo tixraacaaya waraaqda liiska ah ee la kala saxiixday markii guriga la kireeyey.

Haddii aad guriga soo degtay kadib 6^{dii} Abril 2007, waxaa lacagtaada dabaajiga ah ka masuul noqon doona Waaxda Tenancy Deposit Scheme. Haddii aadan ku farax-saneyn uu dabaajiga lagu soo celiyey, waxaa aad la tashan kartaa Adeega Qorsheynta Dabaajiga (Deposit Scheme). Waa in qofka guriga iskalahu ku siiyaa sida aad kula xiriiri kartid waaxda Qorsheynta Dabaajiga (Deposit Scheme). Haddii dabaajigaada aan lagu wareejin Nidaamka Qorsheynta Dabaajiga, waxa aad ku dacwoon kartaa maxkamada. Haddii qofka guriga iskalehu ey ku cadaato in uusan dabaajiga ku wareejin Nidaamka Qorsheynta Dabaajiga, waxaa qofka guriga iskaleh la ganaaxi doonaa lacag u dhiganta sedex jeer inta uu dabaajigu la'ekaa markii hore. Waxa aad faah-faahin ama talooyin dheeraad ah ka heli kartaa dowlada deeganka ama ururka Shelter.

6. Mudada aad guriga ka guureysid

Inta aadan guriga ka guurin, waxa laga yaabaa in qofka guriga iskalahu dad guriga tuso laakiinse waa in qofka guriga iskalahu ku siiyo waqti aad arintaas ugu diyaar gorowdo si aad guriga uga dhigtid mid nadiif ah oo dad la tusi karo.

7. Kirada iyo biilasha

Adiga ayaa ka masuul ah kirada iyo biilasha guriga inta aad degan tahay. Haddii aad qaadatid Manfaca guryahay, inta badan ma ogola in ey laba guri kiro ka bixiyaan sidaas darteed la tasho Xaafiiska guryenta inta aadan guurin.

**Page 3-25 ended here. no translation from 26-31 because there are just samples
Page 32 -39 started here**

Macluumaadka Muhiimka ah

Ururada kireeya guryaha (Letting & Estate Agent Associations)

Ururka kirada iyo Maamulka Guryaha Bristol (Bristol Associations of letting and Management Agents)

www.balma.co.uk

0117 949 4943 ama 01275 840 610

Ururka kireysnta Guryaha Deeganka (Association of Residential Letting Agents)

www.arla.co.uk

0845 345 5752

Ururka Qaranka ee Kireysnta Guryaha (National Association of Estate Agents)

www.naea.co.uk

01926 496 800

Golaha Magaalada Bristol (Bristol City Council)

Su'aalaha Guud

www.bristol.gov.uk

Tel: 0117 922 2000

customerservicesnhs@bristol.gov.uk

Dhaqan Xumada- waxa aad wici kartaa

www.bristol.gov.uk/asb

Tel: 0845 605 2222

Haddii aad ka dacwooneysid dhaqan xumo, waxa dacwada loo gudbin doonaa Askarta (Police) iyo Councilka

Manafacaadka Guryaha iyo Canshuurta (Benefits: Housing and Council Tax Benefit)

www.bristol.gov.uk/benefits

Tel: 0117 922 2300

Imelka: benefits.enquiry@bristol.gov.uk

P.O.Box 43, Bristol, BS99 1BF

Xannaanada Tooska ah (Care Direct)

www.bristol.gov.uk/caredirect

Tel: 0117 903 6684

Imelka: adult.care@bristol.gov.uk

Macluumaadka ku saabsan xannaaneynta cuuryaamiinta iyo waayelka.

Canshuuraadka Guryaha

www.bristol.gov.uk/counciltax

Tel: 0117 925 0981

Imelka: counciltax@bristol.gov.uk

Amelia Court, Pipe Lane, Bristol, BS99 1ZG

Xaafiiska Adeega Macaamiisha

Councilku waxa uu leeyahay xarumo fool ka fool talooyin ah laga bixiyo

- **Xarunta Dhexe** wax ey ku taalaa:
Phoenix Court, Bond Street (waxaa la furi doonaa guga 2009)
- **Xarunta Ashley** waxa ey ku taalaa:
Ashley House, 98-100 Grosvenor Road

St Pauls, Bristol BS2 8YA (waxaa la xiri doonaa guga 2009)

- Xarunta **Bedminster** waxa ey ku taalaa:
Waring House, Redcliffe Hill, Redcliffe,
Bristol BS1 6TB (Waxa la xiri doonaa guga 2009)

Waxa xarun laga furi doonaa st Catherines Place (waxaa la furi doonaa jiilaalka 2009)

- Xarunta **Easton** waxa ey ku taalaa:
Guild Heritage House, Braggs Lane,
St Judes, Bristol BS2 0DN (waxa la xiri doonaa guga 2009)
- Xarunta **Fishponds** waxa ey ku taalaa:
Robinson House, Hockeys Lane
Fishponds, Bristol BS16 3HL
- Xarunta **Hartcliffe** waxa ey ku taalaa:
Symes House, Peterson Square
Hartcliffe, Bristol, BS13 0BD
- Xarunta **knowle** waxa ey ku taalaa:
Salcombe House, 147 Salcombe Road,
Knowle, Bristol, BS4 1AB (waxaa la xiri doonaa guga ama jiilalka 2009)
- Xarunta **Ridingleaze** waxa ey ku taalaa:
Ridingleaze House, Ridingleaze
Lawrence Weston, Bristol BS11 0QE
- Xarunta **Southmead** waxa ey ku taalaa:
Southmead House, 256 Greystoke
Avenue , Southmead, Bristol, BS10 6BQ

Qeylada

www.bristol.gov.uk/noise

Telefoonka: 0117 922 2500

Marka xaafiiska la xiro: 0117 922 2050

Imelka: pollutioncontrol@bristol.gov.uk

Xayawaandka La Xannaaneysto

www.bristol.gov.uk/pestcontrol

Telefoonka: 0117 922 2500

Imelka: pest.control@bristol.gov.uk

Pest Control Office, 7 & 8 Feeder Road

St Philips Marsh, Bristol BS2 0SB

Kooxda Guryaha Dadweynaha (Private Housing Team)

www.bristol.gov.uk/privatehousing

Private Housing teams (LIPS), P.O.BOX 595

Bristol. BS99 2AW

- **Kooxda Waqooyiga (North Team Covering)**

Avonmouth, Bishopston, Brentry,
Fishponds, Frenchay, Henbury
Henleaze, Horfield, Lockleaze, Lawrence
Weston, Sea Mills, Southmead,
Shirehampton, Sneyd Park, Speedwell,
St Andrews, St George, Stapleton,
Wesbury on Trym, Wesbury Park,

Telefoonka: 0117 903 8704

Imelka: ehhousing.north@bristol.gov.uk

- **Kooxda Koonfurta (South Team Covering):**

Bedminster, Bishopsworth, Brislington
Clifton, Cotham, Hartcliffe, Headley
Park, Hengrove, Hotwells, Kingsdown,
Knowle, Redland, St Annes, Stockwood,

Telefoonka: 0117 377 2532

Imelka: ehhousing.south@bristol.gov.uk

- **Kooxda Dhexe**

Barton Hill, Easton, Eastville, Lawrence,
Hill, Montpelier, Newtown, Old Market,
Redfield, St Agnes, St Judes, St Pauls,
St Phillips, St Werburghs, Whitehall

Tel: 0117 903 8980

Imelka: ehhousing.innercity@bristol.gov.uk

Qashinka

www.bristol.gov.uk/rubbish

Telefoonka: 0117 922 2100

Household waste and street maintenance

Manafacaadka Guryaha iyo Canshuurta

Fiiri Qeybta Manaafacaadka

Xiriirka Kireystayaasha (Tenancy Relations)

www.bristol.gov.uk/tenancyrelations

Telefoonka: 0117 914 1206/7

tenancy.relations@bristol.gov.uk

Heerka Ganacsiga (Trading Standard)

www.bristol.gov.uk/tradingstandards

Xiriir Macmaamiisha

www.consumerdirect.gov.uk

Telefoonka (qiimaha deegaanka) 08454 040 506

Su'aalaha la xiriira Macaamiisha

Abniga iyo Dembiyada (Crime and Safety)

Askarta Avon iyo Somerset

www.avonandsomerset.police.uk/community_safety

Tel (qiimaha deegaanka) 0845 456 7000

Maamulka Ilaalinta Xaafadaha

www.crimereduction.gov.uk

Telefoonka: (Telefoon bilaash ah) 0800 0556 688 / 0845 456 7000

Manaafacaadka

Manafacaadka Guryaha iyo Canshuurta

www.bristol.gov.uk/benefits

Telefoonka: 0117 922 2300

Imelka: benefits.enquiry@bristol.gov.uk

PO. Box 43, Bristol, BS99 1BF

Manaafacaad la yiraahdo Income Support, Jobseekers' Allowance, or Incapacity benefit

Tel: (Telefoon bilaash ah) 0800 055 6688

Waaxda Shaqada iyo Howl-gabka

www.jobcentreplus.gov.uk

Telefoonka: (Telefoon bilaash ah) 0800 055 6688

Manfaca Bulshada

Telefoonka: 0117 953 6000

Gargaar dhaqaale oo loogu tala galay dadka Manafacaadka dowlada qaata

Manafacaadka dad ka shaqeeya ama manaafacaadka caruurta

Inland Revenue

www.taxcredits.inlandrevenue.gov.uk

Telefoonka: (Telefoon bilaash ah) 0845 300 3900

Adeega Kirada

www.therentservice.gov.uk/online-services/room-calculator

Xisaabi inta qol oo ey dowladu kuu ogoshahay in ey kaa bixiso.

Gunada loo siiyo xiliga xageyga dadka dadoodu ka weyn tahay 60

www.thepensionservice.gov.uk/winterfuel

Telefoonka: (qiimaha telefoonka) 0845 915 1515

Biilasha

Adeega Shirkada Bristol Wessex Billing (Biyaha)

Tel (qiimaha dirashada telefoonka) 0845 600 3600

Imelka: customer.services@bwbsl.co.uk

Saldhiga Koronta Qaranka

www.nationalgrid.com/uk

Telefoonka: (qiimaha Dirashada telefoonka) 0845 605 6677

Shirada Western Power

www.westernpower.co.uk

Telefoonka: (qiimaha Dirashada telefoonka) 0800 052 0400

Adeega Taloooyinka

Ururka Citizens Advice Bureau

www.bristolcab.org.uk

ama

www.adviceguide.org.uk/ – online service

Telefoonka (qiimaha Dirashada telefoonka) 0844 499 4718

12 Broad Street, Bristol, BS1 2HL

Waxa ey bixiyaan taloooyin bilaash oo ku saabsan sharciyada iyo lacagaha.

Waxa kale oo ey bixiyaan taloooyin ku saabsan xaquuqda daryeelka.

Ururka Shelter

www.shelter.org.uk

Telefoonka: (qiimaha Dirashada telefoonka)

0808 800 4444 (8 subaxnimo- 8 galabnimo)

Talo bixin bilaash ah dadka guryaha u baahan

Maalin kasta oo Isniin is waxa la bixinayaa taloooyin ku saabsan guryaha taas oo lagu qabanaayo xaafada Hartcliffe ee xarunta Symes Community Building oo ku taala jidka Peterson Avenue inta u dhexeysa 10 subaxnimo – 12 galabnimo. Waxaa kale oo lagu qabanayaa xaafada Knowle xarunta Filwood Hope Cente ee ku taala jidka Filwood Broadway maalinta Khamiista ah inta u dhexeysa 10 subaxnimo – 12 galabnimo. Waxaana balan laga sameysan karaa xarunta North Bristol Advice ee ku taala

xaafada Lockleaze, jidka Gainsborough Sq ama waxaad waci kartaa telefoonka nambarkiisu yahay 0117 951 5751.

Xarunta Talooyinka ee Avon

www.advicecentresforavon.org.uk

waxa ey haayaan liiska xarumaha talooyinka bixiya

Xarunta Talooyinka ee Waqooyiga

www.northbristoladvice.org.uk

Telefoonka: 0117 951 5751

Iimelka: team@northbristoladvice.org.uk

Waxa ey talooyin siiyaan dadka ku nool waqooyiga Bristol iyo Koonfurta Gloucestershire sida deynta (waa hadii deyn laguugu leeyahay), shaqooyinka, guryaha, iyo manaafacaad yada dowlada.

Xarunta Sharciga ee Bristol iyo Avon

www.ablc.org.uk

iimelka: mail@ablc.org.uk

Qadka talooyinka guryaha: 0117 916 7730 waxaa la heli karaa maalinta Isniinta inta u dhexeysa 1:00 duhurnimo ilaa 4:00 galabnimo.

Waxaa balanta laga sameysan karaa Xaafiiska ayadoo la soo wacaayo 0117 924 8662.

Qadka talooyinka la xiriira badeecada ama Adeega, qalabka iyo guryaha waxaa la heli karaa maalinta Talaadada inta u dhexeysa 10 subaxnimo ilaa 12 duhurnimo, waana 0117 916 7704. waa adeeg bixiya talooyin, una dooda dadka la cunsuriyeeyo oo mushaaro la'aanta ama mushaaroyar ku shaqeeya.

Xarunta Talo bixinta ee St Pauls

Telefoonka: 0117 955 2981

Iimelka: stpaulsadvise@btconnect.com

Xaruntan waxa ey bixisaa talooyin ku saabsan sharciyada, manaafacaad yada dowlada, deynta (waa marka laguugu leeyahay), guryaha, macaamiisha, iyo arimaha ku saabsan laanta socdaalka (immigrationka).

Ururka St Pauls Unlimited

www.stpaulsunlimited.org.uk

Telefoonka: 0117 903 9934

Ururka St Pauls Unlimited waxa uu la shaqeeyaa dadka doonaaya in ey horuu-mariyaan jawiga, bulshada, iyo dadka ku nool xaafadaha St Pauls iyo St Agnes. Waxa ey qabtaan shaqooyin badan oo kala duwan sida guryaha, abniga bulshada, skuulada iyo nadaafada wadooyinka. Haddii uu

dhib kaa heysto arimaha aan kor ku soo sheegnay ama aad heysid fekrad wanaagsan, fadlan la hadal ururkan.

Adeega Talooyinka ee Koonfurta Bristol

Telefoonka: 0117 985 1122 (24ka saac aqbaar aad ku dhaafi kartaa)

Imelka: admin@southbristol.org.uk

Waa adeega talo-bixin oo loogu tala galay dadka ku nool BS3, BS4 iyo BS13. Waxaa ey talo-bixinta ku qabtaan xarumo kala duwan oo ku yaala Koonfurta Bristol. Waxaa kale oo ey dadka ku booqan karaan guryaha.

Xarunta Talo-bixinta sharciyada

www.clsdirect.org.uk

Telefoonkas (waxa lagu dalacaa qiimaha deeganka) 0845 345 4345

Waxa aad heli kartaa talo-bixint bilaash ah oo waxa qarashka bixiya ururka la yiraahdo Legal Aid.

Caafimaadka iyo Abniga

Talooyin ku saabsan deb-demis taas oo ey bixiyaan waaxda Deb-Demiska iyo badbaada ee Avon

www.avonfirebrigade.gov.uk

Telefoonka: 0117 926 2061

Madax-tooyada Laanta Deb-demisku waa Temple Back, Bristol, BS1 6U

Qadka Talooyinka ee Caafimaadka iyo Abniga la Xiriira Gaska

Telefoonka (telefoonka bilaash ah) 0800 300 363

Xarunta Talooyinka Awooda Korontada

www.est.org.uk/myhome/localadvice

Telefoonka: (telefoon bilaash ah) 0800 512 012

Qadka Tooska ah ee NHS

Waxa ey bixiyaan talooyin ku saabsan caafimaadka

Telefoonka: (waxa lagu dalacaa qiimaha deeganka) 0845 4647

Qalabaka Guriga (sida fadhiga, kuraasta iwm)

Ururka Emmaus

www.emmausbristol.org.uk

Barton Manor, St Philips, Bristol BS2 0RL

Tel: 0117 954 0886

Ururka Sofa Project

www.sofaproject.co.uk

Xarunta Sofa Project waxa ey ku taalaa 48-52 west Street, St Phillips, Bristol BS2 0BL

Telefoonka: 0117 941 3322

Waxaa kale oo ey ku yaaliin: 102 Queens Road, Withywood, Bristol BS13 8PQ

Telefoonka: 0117 935 9995

Shatiga Tvga

www.tvlicensing.co.uk

Telefoonka: (waxa lagu dalacaa qiimaha deeganka) 0845 7289 289

Dowlada Deeganka iyo Jaaliyadaha

www.communities.gov.uk/tenancydeposit

waxa aad halkaan ka heli kartaa:

macluumaadka ku saabsan nidaamka dabaajiga kireystayaasha.

www.communities.gov.uk/publications/

waxa aad halkaan ka heli kartaa:

Qorsheynta iyo horuu-marinta kireystayaasha

Macluumaadka ku saabsan awooda korontada iyo shahaadada

Ururka Horuumarinta kuleylka (warmfront)

www.warmfront.co.uk

Telefoonka bilaashka ah waa 0800 316 2814

Dadka manaafacaadka qaarkood qaata, waxa laga yaabaa in bilaash loogu geliya kululeeyaha dhexe (Central Heating) oo weliba loo dayactiro guriga.

Qadka Laanta Xaquuqda Bini'aadanka iyo mideynta

www.equalityhumanrights.com

Ciwaankuna waa RRLG-GHUX-CTRX, Ardale House, Ardale Centre, Manchester, M4-3EQ

Telefoonka (waxa lagu dalacaa qiimaha deeganka) 0845 604 6610

Xarunta Telefoonka ee ugu weyn England waa:

Telefoonka (waxa lagu dalacaa qiimaha deeganka) 0845 604 6620

Waxaa aqbaar qoraal ah la diri karaa:

Isniinta, Talaadada iyo Khamiista inta u dhexeysa 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo. Arbacadana inta u dhexeysa 9 subaxnimo ilaa 8 maqribnimo.

(Telefoonka ugu dambeeyaa waa 7:45 maqribnimo)

Xiriirka Dowlada ee Tooska ah

www.direct.gov.uk

Macluumaadka ku saabsan adeeg'yada dadweynaha waxa bixiya Dowlada.

Jaamacadaha

Jaamacada Bristol (Bristol University)

Xaafiiska talo-bixinta iyo Gargaarka:

www.bris.ac.uk/accommodation

Telefoonka: 0117 954 5740

Ururka Ardada:

www.ubu.org.uk

Telefoonka: 0117 954 5800

Jaamacada Galbeedka England (University Of the West of England)

Xaafiiska talo-bixinta iyo Gargaarka:

www.uwe.ac.uk/accommodation

Telefoonka: 0117 328 3601

Ururka Ardayda: www.uwesu.org

Telefoonka: 0117 328 2577

Liiska Caafimaadka iyo Abniga Kireystaha

Liiskan waxaa loogu tala in aad ku ogaatid in guirga aad fiiri-neysid uu yahay mid abnigiisu sugan-yahay oo kagu haboon iyo inkale

Qeyb ka mida abniga waa in aad weydiisaa qofka guriga iskaleh, qeybta kalana waa mid guriga aad fiirineysid ku xiran taas oo lagaa rabo in aad adigu iska fiirisid. Haddii mid ka mida su'aalaha hoos ku qorani ey jawaabteedu noqoto, maya, taas macnaheedu ma'aha in aanu gurigu ahayn mid aan abnigiisu sugneyn laakiinse waxa wanaagsan in aad la tashato shaqaalaha Councilka ama qofka guriga iskaleh.

Su'aalaha

Debka	Ma leeyahay ganbaleelka debka sheega ee guriga lagu dhejiyo ?	Haa	Maya	Hadii uu beteri ku shaqeeyo, hubi in uu beteri ku jiro
Gaaska	Ma leeyahay shahaadada gaaska ee la yiraahdo CORGI?	Haa	Maya	Weydiisaa qofka guriga iskaleh in uu shahaadada heysto iyo inkale
Korontada	Ma leeyahay shahaadada korontada ee la yiraahdo NICEIC?	Haa	Maya	Weydiisaa qofka guriga iskaleh in uu shahaadada heysto iyo inkale
Kululeeyaha	Ma leeyahay kululeeye , guriga oo dhan kuleyl gaarsiin kara ?	Haa	Maya	Fiir kululeeyaha guriga ku dhegan
Biyaha Kulul	Musqusha iyo Kushiinku ma leeyahiin biyo kulul?	Haa	Maya	

Keydinta Kululka	Gurigu ma leeyahay dariishado dhaxanta celinaaya?	Haa	Maya	Weydii qofka guriga iskaleh in uu gurigu yahay mid dhaxanta celin kara iyo in kale. Haddii uusan dhaxanta celineyn, waxaa laga yaabaa in bilaash laguugu geliyo ee wac ururka la yiraahdo WarmFront oo nambarkoodu tahay 0800 316 2814
Abniga	Albaabad iyo dariishadaha gurigu ma xirmaayaan?	Haa	Maya	
Uumitada ka dhalata biya	Ma furi kartaa dariishadaha musqusha iyo kushiinka?	Haa	Maya	Waxa kale oo aad daari kartaa marawaxooyinka qiiqa iyo uumitada qaada
Nadaafada	Gurigu ma leeyahay kushiin, musqul iyo meel wajiga iyo gacmaha lagu dhaqdo oo biyo – kulul leh?	Haa	Maya	
Taran-turada iyo kufida	Ma waxaa guriga ku yaal jaran dheer oo hoos u foorarta oo aan la'hayn meel la cugsado	Haa	May	
Arimaha Guud	Xaalada guud ee gurigu ma wanaagsan tahay?	Haa	Maya	

Arimahaan kor ku qoranu oo dhan, waxaa loogu tala-galay in aad fekrad ka qaadatid inta aadan saxiixin heshiiska guriga.

Haddii aad u baahatid faah-faahin dheeraad ah, waxa aad kala xiriiri kartaa Kooxda Gargaarka ee Qeybta Guryaha-dadweynaha oo nambarkoodu yahay 0117 353 3866

Imelku waa: private.housing@bristol.gov.uk ama ka koobi gareyso goga www.bristol.housing.gov/privatehousing